

**Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda
(Financial Assistance Policy)
(GB-16007)**

Bogga dambe 4

**Boqolkiiba Kharashka Guud Ahaan La Soo Dallaco
(Amounts Generally Billed) (AGB)**

Guud ahaan, xisaabta la soo dallaco waa lacag bixinta la fillaayo in lagu bixiyo adeegyada degdegga ama adeegyada caafimaadka loo baahan yahay, laguna soo dallaco bukaanka iyo/ama ballan qaadaha bukaanka. Bukaanka aan ceymiska haysanin ee xaqa u yeesha, xisaabtaan kama badnaan karto xisaabta la xisaabin doono marka la adeegsado Habka Gadaal Fiirinta (Look Back Method) ee ku sharaxan §1.50(r)-5(b) (3) Koodka Adeegga Dakhliga Canshuurta (Internal Revenue Service Code).

Habka Gadaal Fiirinta (Look Back Method) waxay ku saleysnaan doontaa bixinta-khidmadda-adeegyada Medicare ee la xariira adeegyada iyo dhamaan ceymiyayaasha caafimaadka gaarka kuwa bixiya qaanta. Qaanta loo baahan in lagu darro xisabaadka AGB waxay ahaan doonaan qaanta la ogol yahay inta ay socoto muddada 12da bil jadowalka sannadka.

Xisabaadka bukaanka ku darro, ha ahadeen kharashka bukaanka ku darro daweynta (co-payment) ama kharashka laga gooyo bukaanka (deductibles) waxaa lagu darri doonaa xisaabta dhanka kore waxaana raaci doono khidmadda Medicare ee lagu bixiyo adeegga iyo dhamaan qaanta la ogol yahay ee laga qaato ceymiyayaasha gaarka ee bixiya qaanta Kharashka guud ahaan la soo dallaco lana xariira qaanta la soo sheegay waxaa lagu darri doonaa xisaabta hoose.

Xisaabinta AGB kama yaraan doonto sannadkii ugu dambayn maalinta 45aad kaddib ka hor inta aan la gaarin sanadka waxaana la fulliyaa maalinta 120aad kaddib marka la xero sannadka jadowalka.

Laga Bilaabo Taariikhda	Boqolkiiba
Abril 1, 2023	47,8%
Abril 1, 2024	49.4%